

WASAARADDA HORUMARINTA  
MAALIYADDA



وزارة المالية والتطوير  
MINISTRY OF FINANCE  
DEVELOPMENT



**Wasaaradda Horumarinta  
Maaliyadda JSL**

# Wargeyska Danjire

Wasaaradda H. Maaliyadda Somaliland  
Oo 25 Xubnood Oo Ka Mid Ah Ganacsatada  
Dawladda Wax Ka Libiya Ku Tababartay  
Nidaamka Dalbashada Qaansheegta.

Wasiir-Xigeenka H. Maaliyadda JSL Iyo Wafti Uu  
Hogaaminayo Ayaa Kormeer Ku Tagay Xafisyada  
Wasaaradda Maaliyadda Ee Gobolka Sanaag.

Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo  
Tababar Usoo Xidhay Saraakiil Lagu Tababarayey  
Daryeelka-Macmiilka Iyo Anshaxa Shaqaalaha.

Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Xirfaddooda Shaqo  
Kor Loogu Qaadayo U Qabatay Qaar Ka Mid Ah Saraakiisha  
Xafiiska U Qaybsan Cashuuraha Macaashal-Macaashka  
Shaqaalaha [Payroll Income Tax]

"Wixii aad cabasho ama talo qabto  
waxa aad nagula wadaagi kartaa."



**9494**



Info@slmof.org  
Slmof.org



WAAXDA X/DADWEYNAHA & XOGTA

JANUARY - MARCH 2024



# Fariinta Hawlwadeenada Danjire

**Danjire waa xog-side sedex-biloodla ah, kaas oo ay soo saarto Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL. Waxaanu dadweynaha kula wadaagnaa wixii xog ah ee aanu muhiim u aragno, anagoo kusoo ururina wixii dhacdooyin ah ee la xidhiidha shaqada aanu u idmanahay.**



**Wixii talo iyo toosin ah ee aanu ku horumarin karo xogsidahan iyo guud ahaanba shaqada Wasaaradda waxaad nagula wadaagi kartaan Email-ka Wasaaradda: [Info@slmof.org](mailto:Info@slmof.org) ama formka cabashada iyo talooyinka ee Website-ka W.H.Maaliyada [www.Slmof.org](http://www.Slmof.org).**

Follow & Subscribe us



# Tusmada

Nidaamka Casriyeynta Nootaayooyinka Ee Qabashada Dakhliga Cashuuraha Kala-Wareejinta Iibka Hantida Ma-Guurtada iyo Guurtadaba. ....	4
Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Usoo Xidhay Saraakiil Lagu Tababarayey Daryeelka-Macmiilka Iyo Anshaxa Shaqaalaha.....	5
Wasaaradda H. Maaliyadda Somaliland Oo 25 Xubnood Oo Ka Mid Ah Ganacsatada Dawladda Wax Ka Ibiya Ku Tababartay Nidaamka Dalbashada Qaansheegta .....	7
War-Bixinta Sanadlaha Ah Ee Wax Qabadka Wasaaradda Maaliyadda Oo Waaxaysan .....	9
Wasiir-Xigeenka H. Maaliyadda JSL Iyo Wafti Uu Hogaaminayo Ayaa Kormeer Ku Tagay Xafiisyada Wasaaradda Maaliyadda Ee Gobolka Sanaag.....	11
Munaasibadda Xil-wareejinta Agaasimayaasha Waaxaha Kastamada, Miisaaniyadda iyo Hanti-dhawrka Gudaha.....	13
Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Xirfaddooda Shaqo Kor Loogu Qaadayo U Qabatay Qaar Ka Mid Ah Saraakiisha Xafiiska U Qaybsan Cashuuraha Macaashal-Macaashka Shaqaalaha [Payroll Income Tax].....	15
Buugga Xogsidaha Cashuurta iyo Cashuur-bixiyaha .....	17
Buugga Qiimaynta Badeecadaha (Customs Valuation Book 2020).....	20

## **Nidaamka Casriyeynta Nootaayooyinka Ee Qabashada Dakhliga Cashuuraha Kala-Wareejinta Iibka Hantida Ma-Guurtada iyo Guurtadaba.**

Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL iyada oo ka duulaysa baahida loo qabo nidaaminta iyo sugida dakhliga cashuurta kala-wareejinta iibka hantida, isla jeerkaasna ka shidaal-qaadanaysa kulamadii is-xig-xigay ee ay wada yeesheen Wasaaraddaha Maaliyadda, Cadaaladda iyo Gudiga Nootaayooyinku, waxa ay bulshada iyo bahda nootaayooyinkaba la socodsiinaysaa in Wasaaradda Maaliyaddu yagleeshay hanaan is-wada oo casriya kaas oo lagu maarayn doono qabashada dakhliga cashuuraha ku waajibay marka hanti la kala iibsado.

### **Hadaba, waxa Nootaayooyinka lala socodsiinayaa arimahan:**

- Dhamaan nootaayooyinka waxa la farayaa inay adeegsadaan nidaamka Wasaaradda Maaliyadda ee qabanaya Cashuurta kala wareejinta.
- In nootaayooyinku reebaan Cashuurta kala-Wareejinta iyaga oo adeegsanaya Systemka cusub ee W. Maaliyadda laga bilaabo bisha April, 2024.
- Inay kaliya sharci tahay warqadda heshiiska ee laga daabaco nidaamka cusub ee Wasaaradda Maaliyadda.

### **Waxa sidoo kale lala socodsiinayaan bulshada gaar ahaan Cashuurbixiyaasha qodobadan:**

- In Cashuurta kala-wareejinta dhulka, dhismaha, baabuurta iyo wixii la hal-maala la bixin doono marka uu dhacayo heshiiska iibka hantidu.
- In cashuurta kala-wareejinta dhulka, dhismaha, baabuurta lagu dhex bixin doono xafiiska nootaayadda dhexdiisa.
- In cashuurta kala-wareejinta dhulka, dhismaha, baabuurta lagu bixin doono habka casriga ah E-payment-ga ee Wasaaradda H. Maaliyadda.

Waaxda X/Dadweynaha & Xogta

Website: [www.slmof.org](http://www.slmof.org)

Email: [Info@slmof.org](mailto:Info@slmof.org)

Call: 9494

WhatsApp No: + 252-657729999



# Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tababar Usoo Xidhay Saraakiil Lagu Tababarayey Daryeelka-Macmiilka Iyo Anshaxa Shaqaalaha

**“Cashuurtu Waa Waajib Dastuuri Ah Oo Xeerarkeena Iyo Dasturkeena Ina Faraya Gudasho La’aanteeduna Waxaa Ka Dhalanaysa Cigaab” Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka)**



**H**argeisa 21 March, 2024 [ W.H.M ] - Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka) ayaa 21 february, 2024-kii tababar muhiim ah u soo xidhay saraakiil ka tirsan Waaxda Cashuuraha-Berriga ee degmooyinka magaaladda Hargeisa, kuwaas oo lagu tababarayey casharo ku tacaluqa Daryeelka-macmiilka iyo Anshaxa Shaqaalaha.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md. Maxamed Xuseen Cismaan ayaa carabka ku adkeeyey muhiimada iyo mudnaanta loo baahanyahay in la siiyo macaamilka fiican ee bulshada cashuur-bixiyaasha iyo sida ay lagama-maarmaan ka u tahay in la xoojiyo anshaxa shaqaalaha.

Isagoo arimahaasi ka hadlayana waxa uu Agaasimaha Guud hadalkiisa ku bilaabay “Waxaad halkan ku baranayseen xuquuqda iyo waajibadka cashuur-bixiyaha iyo sidoo kale waajibaadka cashuur-qaadaha oo ah Wasaaradda Maaliyadda. Cashuurtu waa waajib Dastuuriya oo xeerkeena iyo dasturkeenaana ina faraya gudasho la’aanteedana waxaa ka dhalanaysa cigaab, qofkii cashuur bixiyaha ah sidaad u la macaamilayso ayaa halkan laynoogu sheegay”. Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka) isagoo hadalkiisa sii wata, isla markaana hogo-tusaalaynaya saraakiisha tabobarka qaadanaysay waxa uu intaas raaciyey “Tusaale yar hadaan idin siiyo hadii aad meherad aad haysato meherada aad haysato qofkasta oo kuu soo gala, qofka meherada haystaa wuxu jecelyahay inuu alaabta uu hayo ka iibsado oo aanu ka bixin isaga oo faro-madhan kama daalo oo kama xanaaqo hadii uu qofku suaalo farabadan waydiiyo, hadii uu baayacaad badan ku sameeyo, hadii uu kolba shay u diro oo uu dhibo kama daalo oo kama xanaaqo, ilaa uu ku guulaysto in uu qofkasi wax ka iibsado meherada. Sidaas oo kale ayeynu ka dhiganahay ka Wasaarad Maaliyad ahaan, qofka inoo imanaya ee cashuur-bixiyaha ah ama kaynu u tagaynaba sida ugu edebta badan ugu akhlaaq wangaagsan ugu dabacsan waa inaynu u la dhaqano, iyada oo aynan

sharciga ka tagaynin inaynu cashuurta ka qaadno ayeynu rabnaa, markaa waxaynu u baahanahay samir, dulqaad, wacyigelin, iyo inaad qofkaasi oo raali ah in uu cashuurta bixiyo oo aad ku kaliftaan isagoo degen.

Halka aynu u soconaa waxaa weeyi inaan cashuur-bixiyaha la khasbin ee isaga oo mutadawaca oo xor ah uu cashuurta soo xareeyo, oo dhibta faraha badan ee imika ka dhalata raadinta cashuurta iyo mararka qaarkood loo adeegsano dhaqangalinta, tusaale ahaan Cashuurta Waddo-mariista oo kale marka aanu dariiqa taaganahay oo ninka darawalka ahi ku jiidhayo Traffica iyo adigaba ama ku aflagaadeynayo ama waxyaabo kale sameynayo halkaynu u soconaa waa qofkaa aynu cashuurta ka qaadayno isagoo raaliya in uu cashuurta bixiyo halka aynu ku soconaa waa halkaa, isaga oo raaliya oo ku qanacsan waxan uu bixinyaa dareemayo inaanay badnayn oo ciqaabna ahayn, ay tahay wuxu raali ka yahay oo isagu dhiibayo”.



## Wasaaradda H. Maaliyadda Somaliland Oo 25 Xubnood Oo Ka Mid Ah Ganacsatada Dawladda Wax Ka Iibiya Ku Tababartay Nidaamka Dalbashada Qaansheegta



**H**argeisa 21 March, 2024 [ W.H.M ] Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka) ayaa 20 February 2024-kii tabobar mihiim ah u furay 25 xubnood oo ka mid ah ganacsatada Dawladda wax ka iibiya, kuwaas oo lagu tabobaray Nidaamka Dalbashada Qaansheegta, kuwaas oo halkaasi ku qaatay casharo ku tacaluqa sida ugu haboon ee ay biilashooda u soo dalacan karaan iyagoo isticmaalaya Hanaanka Is-wada Ee Maaraynta Xogta Maamulka Maaliyadda Dawladda Somaliland {FMIS}.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka) oo tabobarkaas furay ayaa ku booriyey inay ka soo qaybgalayaashu ka faa’idaystaan oo ay weeleeyaan casharada halkaasi loogu dhigay mudadii uu socday tabobarku, isagoo sidoo kale ku dheeraaday mihiimada uu maamul-wanaaga iyo daah-furnaanta u leeyahay Nidaamka Is-wada Ee Maaraynta Xogta Maamulka Maaliyadda Dawladda Somaliland {FMIS}.

Waxaanu Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Mu’adinka) tibaaxay in yoolka iyo qorshaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu yahay in Nidaamka Dalbashada Qaansheegta laga dhigo mid online-ah oo is-wada {automate}, iyada oo aanu macmiilku imanin xafiisyada Wasaaradda uu nidaamkiisa ku dhamaysto qaab online-ah.

Sidoo kale waxa isaguna halkaasi ka hadlay Agaasimaha Waaxda Maamulka & Lacagta Md. Xuseen Xasan, waxaana hadalkiisii ka mid ahaa “Tabobarkani waxa loo qabanayaa Macaamiisha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda wax ka iibiya, waxaanu ku saabsanyahay Daryeelka macaamiisha, gaar ahaan Nidaamka Dalbashada Qaansheegaha, iyadoo inta badan macaamiishu dhib badan kala kulmi jiray sida ay lacagtooda u heli lahaayeen ama u dalbanayaan oo aanay wax badan ka fahamsanayn.





Faa'idada ugu wayn ee aad tabobarkan ka helaysaana waxa weyi in la idinku tabobaro nidaamka aad u maraysaan dalbashada qaansheegta oo ka fudud kii hore, muddada aad sugaysaan iyo dhammaan waraaqaha la idiinka baahanyahay in aad soo raacisaan Qaansheegihiina”.



## War-Bixinta Sanadlaha Ah Ee Wax Qabadka Wasaaradda Maaliyadda Oo Waaxaysan



**H**argeisa 21 March, 2024 [ W.H.M ] - Kulankahawleed lagu qiimaynayey waxqabadka Waaxaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ee sanadkii hore ee 2023 ayaa ka qabsoomay {28 Jan, 2024} Hall-ka shirarka Xafiiska Xisaabaadka Guud ee Dawladda.

Kulankan oo ah mid sanadle ah ayuu ujeedkiisu daaranaa sidii loo qiimeyn lahaa waxa Waax walba uga qabsoomay qorshaheedii saanadlaha ahaa; iyada oo Agaasime waaxedyadda mid kasta gaarkiisa looga dhagaystay war-bixin ku aaden wixii uga qabsoomay bartilmaameedkii loo asteeyey ee ku xusnaa qorshe-hawleedka Waaxdaasi, hawlaha baaqday ee aan qabsomin iyo asbaabaha ay u qabsoomi waayeen.



Kulankahawleedka ayey goob-joog ka ahaayeen Wasiirka Wasaaradda Dr. Sacad Cali Shire, Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Md. Saleebaan Jaamac Diiriye iyo Agaasimaha Guud ee Maaliyadda Md. Maxamed Xuseen Cismaan {Muadinka}, in kasta oo ay kal-hore [2023] jireen culaysyo badan oo soo wajahay habsami-u-socodka hawlaha Wasaaradda hadana waxa laga dheehan karayey war-bixinta masuuliyiinta Waaxaha in ay Wasaaraddu horumar fiican ka samaysay dhinacyo badan. Dhinacyada horumarka fiican ay Wasaaraddu ka samaysay waxa ka mid ahaa:



- Meel-marinta iyo adeegsiga hababka ama systems-ka casriga ah ee is-wada.
- Dib-u-habbeynta Maamulka Maaliyadda.
- Casriyeynta Cashuuraha-Berriga iyo Kastamadda.
- Wacyi-galinta & xoojinta xidhiidhka Cashuur bixiyaha.
- Dabbaqaadda xeerarka.
- Dib-u-habaynta hanaanka diyaarinta Miisaaniyadda iyo kharash bixinta.
- Wax-Iibsiga iyo bixinta qandaraasyada.
- Dib-u-habbeynta shaqaalaha.
- Siyaasaddaha kobcinta dhaqaalaha iyo dhiiri-galinta wax-soosaarka gudaha.
- Iyo arimaha la hal-maala.



Wasaaradda H.Maaliyada JSL waxa ay leedahay qorshe u yaal oo sanadle ah, iyo waliba Qorshaha Istiraatiyadda Shanta Sano oo ah khariidadda ama jidka Xafiis-kaastaa u raaco socodsiinta hawlaha uu u idmanyahay. Waxaana laga yeeshaa kulamo sadex-bilood ah, lix-bilood iyo kuwa sanadle ahba kuwaasi oo ah qiimayn iyo dib-u-eegis si la isula eego waxa ka fulay hawlihii qorshaysnaa iyo kuwa taagan ee qabsoomi waayey.

Kulan-hawleedka oo qaatay saacado badan waxa soo xidhay Wasiirka Wasaaradda Dr. Sacad Cali Shire isaga oo masuuliyiinta Waaxaha ku amaanay sida xilkasnimada leh ee ay u guteen waajibaadkii loo xilsaaray, isla markaana kula dardaarmay u diyaargarawga meelmarinta waajibaadyada {Bartilmaameedyo} ku xusan Qorshe-hawleedka sanadkan bilawga ah uu ku hawl-gali doono xafiis kaastaa ama Waaxkaastaa.



## Wasiir-Xigeenka H. Maaliyadda JSL Iyo Wafti Uu Hogaaminayo Ayaa Kormeer Ku Tagay Xafiisyada Wasaaradda Maaliyadda Ee Gobolka Sanaag



**C**eerigaabo, 25 March 2024 (W.H.M) - Wasiir-Xigeenka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md. Saleebaan Jaamac Diiriye iyo wafti uu hogaaminayo oo kormeer shaqo ku marayey goboladda bariga Somaliland ayaa kormeer ku tagay xafiisyada kala duwan ee Wasaaradda Maaliyadda ee Gobolka Sanaag.

Wasiirka ku xigeenka Horumarinta Maaliyadda Md Saleebaan Jaamac Diiriye iyo waftigiisa oo ujeedada socdaalkoodu daarnayn dar-dargalinta dakhliga iyo shaqada Wasaaradda u hayso bulshadda JSL ayaa goobihii uu maray kula dardaarmay shaqaalihii, saraakiishii iyo masuuliyiinta Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda ee goobahaas ka hawlgala kuwaas oo uu ku booriyey inay noqdaan Safiir wanaagsan oo sawir fiican ka bixiya Wasaaradda horumarinta Maaliyadda ee ay wakiilka ka yihiin.



Sidoo kale Wasiir ku xigeenka horumarinta Maaliyadda Saleebaan Jaamac Diiriye ayaa bulshadda gobolka Sanaag ugu baaqay inay cashuuraha sharciga ku waajibiyey si fiican u bixiyaan si loogu qabto adeegyada bulshadda ee dawladdu u xil-saaran tahay. Ugu horayna isagoo Wasiir ku xigeenku arimahaas ka hadlaysa waxa hadalkiisa ka mid ahaa “Waxa uu daaran yahay socdaalkayagani shaqo maalmeedkayagii caadiga ahaa iyo dardargalintii hawlaha dakhliga iyo u kuurgalida hawlaha Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddu ka hayso gobolka Sanaag. Waxa aan halkan uga mahadnaqayaa shaqaalaha kala duwan ee Wasaaradda ee gobolka Sanaag hadii ay tahay shaqaalaha Waaxaha Kastamadda iyo Cashuuraha Barriga iyo Xisaabaadkaba, waxaan ku bogaadinayaa oo aan uga mahadnaqayaa dadaalka ay sameeyeen ee Hawlaha dakhliga. Sidoo kale waxa aan halkan uga mahadnaqayaa dadwaynaha gobolka Sanaag gaar ahaan reer Ceerigaabo oo si wanaagsan cashuuraha ku waajibay u bixiya, kuwaas oo iyagoo ay gobolka ka jiraan duruufo badani hadana si fiican u bixiya cashuurta, iyadoo aan hadalkayagan uga faaidaysanayo una sheegayo bulshadda gobta ah ee gobolka Sanaag inuu jiro tartan ay goboladda Somaliland ku jiraan, isla markaana gobolka Sanaag uu yahay gobol balaadhan oo khayraad badana caan ku ah, inay kor u qaadaan dadaalkooda cashuur-bixinta”.

“Magaalo walba waxa lagu qiimaynayaa sida ay cashuurta u bixiso, markaa waxa aan reer Sanaag ku boorinayaa inay la tartanto Burco iyo Boorama, dhamaan saraakiisha kala duwan iyo bulshadda sharafta leh ee gobolkaba dhamaantood waajib baa ka saaran inay qayb ka noqdaan oo saraakiisha Wasaaradda kala shaqeeyaan Hawlaha baaxada leh ee ay bulshadda u hayaan oo uu ugu horeeyo dakhli ururintu”.



## Munaasibadda Xil-wareejinta Agaasimayaasha Waaxaha Kastamada, Miisaaniyadda iyo Hanti-dhawrka Gudaha



**H**argeisa 21 March, 2024 [ W.H.M ] - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) ayaa 23 March 2024-kii xilkii u kala wareejiyey Agaasimayaashii hore iyo kuwa cusub ee dhawaan loo magacaabay Waaxaha Kastamadda, Miisaaniyadda iyo Hanti-dhawrka Gudaha, kuwaas oo si rasmi ah xilalkii ugula kala wareegay munaasibad ka qabsoontay 23 March hoolka xafiiska Xisaabaadka guud ee magaaladda Hargeisa.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Md Maxamed Xuseen Cismaan (Mu'adinka) ayaa masuuliyiintii hore ee waaxahaasi uga mahadnaqay mudadii ay waaxahaasi hogaaminayeen waxyaabihii u qabsoomay iyo dadaaladii ay sameeyeenba, iyadoo uu sidoo kale Agaasimaha guud masuuliyiinta cusub ee loo magacaabay Waaxaha Kastamadda, Miisaaniyadda iyo Hanti-dhawrka Gudaha kula dardaarmay inay dadaal la yimaadaan isla markaana ay halkii masuuliyiintii ka horaysay soo gaadhsiyeen Waaxahaas inay halkii kasi wadaan dadaalka.



Ugu horayna Agaasimaha Guud isagoo arimahaasi ka hadlaya waxa hadalkiisa ka mid ahaa “Masuuliyiintan xilka wareejinaysa oo mudo soo hogaaminayey Waaxaha Kastamada, Miisaaniyadda iyo Hantidhawrka



Gudaha oo runtii mudadaasi wax badan soo qabtay waxaan Ilaahay uga baryeyaa inuu ka abaalmariyo wixii ay dadkooda iyo qarankoodaba usoo qabteen ee wanaagsanaa, run ahaantii masuuliyiintani way nasanayaan oo culays ma saarna oo xilkoodii way soo guteen Ilaahay ha ka abaalmariyee, imikana Waaxihii kama tagayaan ee waxay noqonayaan xubno la-taliyeyaal ama khubaro ah oo laga faaidaysan doono khibradooda iyo aqoontooda isla markaana barbar-joogi doona masuuliyiinta cusub. Sidoo kale waxay hawli u taalaa imika oo culaysku wuxuu ku wareegayaa Agaasimayaashan cusub oo hawl badani sugayso, iyagana Ilaahay ha ku ašturo masuuliyadaha culus ee loo igmaday”.

Hargeisa 28 february, 2024 [ W.H.M ] Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda JSL Dr. Sacad cali Shire oo ku hadlaya magaca Gudoomiyaha guddida caymiska somaliland ayaa daah furay Shirweynaha dhaqaalaha islaamka oo loo xushay in uu somaliland ka qabsoomo 5 March 2024.

Wasiirka Wasaaradda Horumatinta Maaliyadda Somaliland Dr. Sacad Cali Shire oo kulankaasi furay ayaa ka war bixiyay bandhiga ama Tabobarka shirkan oo la xidhiidhadha mawduuca Caymiska somaliland, waxaana hadalkiisii ka mid ahaa:

Aniga oo ku hadlaya magaca Gudoomiyaha guddida caymiska ee Somaliland waxaa aynu donaynaa in halkan idnku bushaareeyo idnku marti qaado dhacdo iskugu jirta bandhig iyo Tabobar iyo xog is waydaarsi, oo ku saabsan caymiska Islamigaa iyo Banigaga islamigaa, oo aynu iska kashanay Hay’adda caalamiga ee layidhaa AL HUDA, Shirkaan waxaa iman doona ama kasoo qayb gali doona khubro badan oo caalamiya fursadna waynu u helidoona in aynu ka barano labada cisho ee 6-7 bisheeda waxa laqaban doona Tobobar.

Shirkan run ahaantii qiima wayn ayuu inoogu fadhiiyaa maadama uu yahay arin caalmiya.

Wax badan ayuu ka tari doona dadka somaliland aan aqoonin inay bartaan markaa qiimo wayn ayuu inoogu fadhiiyaa, sideedaba arinka caymiska waa arin aad iyo aad u muhiim ah marka laga hadalyo arimaha Maaliyadda, Qaybta maliyaddu guud ahaan waxaa ay ka koobantahay qaybta Baananka iyo shirkadaha caymiska iyo shirkadaha sanduuqa ee hawl gabka, sadexdas aya ugu waawayn runtii.

Qaybta caymisku wa qayb aad iyo aad u muhiim ah, waayo marna waxaa la qaybsadaa dhibka loogu tala galay, marna waa dhigaal oo lacagta wixii la bixiyaya mooyane wixii kale waa laga faa’idaystaa maalgashi ayaa lagu sameeya, marna waxay fududaysaa ganacsiga iyo is waydaariga, oo imka hadii aynu caymis leenahay ku xidhan caalmaka intiisa kale ino fududanaysa sidii caalmaka intisakale inoogu iman lahaayenen ama inoo maalgashan lahayeen ama badeecaddaba isku waydaarsan lahayn marka waa arin xitaa inagag xidhan halka dhaqaalaha iyo shaqo abuurka iyo horumarka.

## Wasaaradda H. Maaliyadda JSL Oo Tabobar Xirfaddooda Shaqo Kor Loogu Qaadayo U Qabatay Qaar Ka Mid Ah Saraakiisha Xafiiska U Qaybsan Cashuuraha Macaashal-Macaashka Shaqaalaha [Payroll Income Tax]



**H**argeisa 28 March, 2024 [ W.H.M ] Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda Md. Maxamed Xuseen Cismaan (Muadinka) ayaa tabobar u soo xidhay saraakiil ka tirsan waaxda Cashuuraha-Berriga Gaar ahaana shaqaalaha ka hawl gala uruurinta cashuurta shaqaalaha, tobobarkan oo socday mudo laba cisho ah waxa uu ku saabsanaa Cashuurta Shaqaalaha oo loo yaqaano Payroll tax, Waxaana ka faa'idaystay intuu socday hawal wadeenadii loo qabatay tobobarkani aqoon la xidhiidha nidaamka qaadida cashuurta shaqaalaha iyo waliba Xeerarka jideenta qaadii'eeda, waxaana hadalkiisii ka mid ahaa:

Aad baan ugu faraxsanahay runtii inaan arko tobobar practical ah, ama waaqiciya oo ku saabsan cashuuraha gaar ahaan cashuurta shaqaalaha, horumar waxaa la sameeya ama wax la saxaa aqoon, hadii aad aqoon u lahayn waxaa ad qabanyso wax badan ayaa kaa qaldamaya horumarkii iyo adeegii aad samayn lahayd aad ayuu u gaabinayaa, markaa waalgama maarmaan tobobarada noocani iyo kuwa kale ee la xidhiidha guud ahaan inaan joogteeno.

Cashuurta shaqaaluhu waa meelaha inoogu muhiimsan, filimaayo inay qaybta dadwaynaha in ay cashuuri ku maqan tahay xaga dawladda, laakiin waxay ku maqan tahay cashuurta inteeda badan qaybta gaarka loo leyahay, umadda %95 waa shaqeeeye ama waa loo shaqeeeye, markaan kaso bilawno inanta guriga ka shaqysa ama inanka baska lacgta ka uruuriya ama qofkasta oo shaqo haya waa shaqeeeye oo cid ayuu u shaqeeya dadkaa shaqaalaha iyo dadka loo shaqeeeyaha labaduba wajibaadkoodii ma gutaan xuquuqdodina way maqanatahay, matalan qofka shaqaalaha hadii uu ka shaqeeeyo qaybta cuntada Hotel ka oo dadka wax karinaya ka mid yahay ay dhibaato ka soo gaadho maalinta xigta qofka meherada lahaa qofkale ayuu u yeedha qofkaasi wax xuquuqa male, ka dhisme ka shaqeenaya ee ka soo dhaca ee jaba ama burbura qofkale uunba halkiisi badalaya wax xuquuqa uu leeyahay ma jirto mid walba waa sidaa, dadkaa waxaa maqan xuquuqdoodi loo shaqeeysa ee dadka shaqaalaha iyagana waajibadka ay gudan lahayeen ayaa maqan waajibkoodu waa in ay cashuur bixiyaan oo dakhliga soogala ay wax ka bixiyaan. Sidaa aad sheegten cashuurta waxa lagu leeyahay qofka shaqaalaha, laguma laha loo shaqeeeyaha, laakiin loo shaqeeeyuhu waa qofkii uruurinayay cashuurta, loo shaqeeeyuhu maaha in uu u qaato lacag uu jebkiisa ka bixinayo, taasina waxay ku imanysaa in marka horba Heshiis jiro sababta imka uu uleeyahay anagaa ka bixina waxa laga yaaba intabadan in aanu heshiis u dhaxayn loo shaqeeeyaha ay atahay heshiis afkaa oo wax qoraal ahi jirin. dawladda waxa u qaabilsan qaybta gaarka loo leeyahay Wasaaradda shaqo galinta, Wasaaradda shaqo galinta wada hadal ayaa noo socda in la sameeyo

baadhid oo la tiro koobo dadka shaqaalaha ah iyo loo shaqeeyaha.

Wasaaraddu heshiis kasta oo laba qofi wada galayaan ama shirkad iyo qof shaqala ahi wada galayaan in ay qayab ka ahaato siday markii horba ahaan jirtay, Heshiiska waxa lagu cadeenaya xuquuqii qofka shaqaalaha iyo xuquuqii loo shaqeeyaha labadba. Waxa hawsheedii inoo soctaa sidii loo bilaabi lahaa, Wasaaradda waxaa imka u imaada marka ay murmaan dadkii iskood u heshiiyay oo Wasaaraddu markii hore qayb ka ahay, markaa ay murmaan ay isku qabsadaan xuquuqo ayay dacwadu utimaada Wasaaradda shaqo galinta, inaga waxa inaga maqan cashuurtii aynu dadka shaqaalaha ku waajibtay, dadka shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha labaduba inay cashuurta bixiyaan iyo in xuquuqdooda la ilaaliyo. Waxan filaya tobobarkan aad qadteen in uu yahay TOT oo idinku inad sii tobarbartaan shaqaalaha kale ee dagmooyinka jooga oo aad ku tobobartan wixii aad barateen, sidaa aad sheegten fahan badan ayaa idin kordhay oo ku saabsan cashuurta, waxyaabo badan oo idna ka daahana ayaa laydinku tobobaray, macluuumad badan ayaad ka hesheen waxad ku dabaqaysaan shaqadiina aad malin walba haysaan, waxana rajeenayaa buugagtu hadanay idin gaadhin ama xeer nidaam yaasha iyo buugagta cashuurta lagu qaada in iyagoo online ah ka heli kartaan website ka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.

Tobobardana kuwan iyo kuwa ka dawanba waynu joogtaynyana insha allah, waayo hadii aan aqoonta la korin qofku wuxu qabanyo aanu garnayn shaqona wanaagsanan mayso halkii uun baynu fadhiiyayna sidii dabiiciga ahayd, aad ayan udaneenayaa shakhsiyayn Waaxda Cashuuraha-Berriga oo ha Waaxda ugu sal balaadhan Wasaaradda, Kastamadu waa meel kooban waxaana ay ka shaqeeyan wax usoo galay uun halkaa ay joogan, tacriifadana way isticmaalan, laakiin Cashuuraha-Berriga %10 maynaan gaadhin way inaga maqan yihiin wixii oo dhambi waa meel sal balaadhan oo ubaahan aqoon ahaan ufidino oo aynu ku durgno si cashuur loo helo, Mustaqbalka danbana ay noqoto ya kaliya aynu ku tiirsanahay.

Maanta waxay maraysaa %23 ayay dakhliga guud ka yihiin Cashuuraha-Berrigu, waxynu rajeenayna in aynu kor usocono sanadkan gudihisa wax ku darno oo %40 gaadhsiino oo aynu sii socono ilaa aynu ku dhawaanayno Kastamadu noqonyan inta ugu yar, kastamku halka maanta uu ka yahay %75 in uu ka noqdo %30 ama kaba sii yaraado, waayo ta rasmiga wataa. Cashuurta kastamada inaga soo gashaa waxay ku xidhanatay waxa la soo dajinayo duruufo badan ayaa saameya, badaa xidhmi karta, xasilooni darro aya iman karta, oo gadashadii baa soo dajintii yareen karaysa laakiin tani waa joogteen, dakhli kasta oo qof soo gala in senti yada cashuurta lagu leeyahay ay soo hooydaan, markaa waaxdna wixii anu qaban karno oo awoodi noo saamaxdo waan la qabnaynaa, dhinac aqooneed iyo dhinac dhaqaalaha iyo daryeelka shaqaalaha in anu ka shaqeenoo oo aanu u fududeeno kula hawal galno.

Cashuurta GSTga ayaa imka xooga dhaqaaqday iyada qudheeda fari kama qodna, cashuurta Payrollka waata inoogu xigta aynu u baahanahy in aynu olole ku qaadno marka imka idnku aqoonta sii gadhsiisaan wa ta labaad ee aynu ku fidayno kabacdina cashuurta daarha, sidaas ayaynu usi socondoonaa, cashuura badan aya inaga maqan oo dadkuna u baahnyihiin, dadkeenu cashuurta waxay u yaqaanaan ama baad bay u yaqaanan, laakiin waa in aynu nasteeexo tusnaa cashuurta la qaadayo, Inay dantooda tahay oo ay tahay waajib Dastuuriya iyo mid diimeedba, labadaba way tahay cashuurta, waana wax soo jireen ahaa ilaa cahdigii khulafada iyo intii ka danbeysayba way jirtay cashuurta waana waajib diiniya, waa xaq qofka maalka haystaa in uu ka bixiyo maalkisa oo ka aan waxaba haysan loogu adeego ama lagu dar yeelo waa xaq loogu leeyahy.

Wacyigelinta in aynu kor u qadnaa wa muhiim kuligeenba Waaxdena Xidhiidhka-Dadweynahana way ka shaqayn si shakhsiyana waynu ugali, intaynu ka fahansiin karyno waynu wadi cashuurta waxay tahay iyo macnaheeda iyo faaidada ay leedahay, iyo in aanay hayan wax baad ah oo laga qaadayo qofka oo ay tahay waajib lagu leeyahy ay tahay in aynu dadka barikaryno, muddo ayaa ay qaadanysa laakiin aakhirka into dadka farabadni way fahmi doonan, wan soo dhaweynaynaa tobobarkan,manhaj ayaa la samayn doonaa oo ku saabsan cashuuraha, qiimayan in lagu qaato oo hay'adda tacliinta sare ama waxbarshada loo sameeyo qiimayn, midna waa laydinka fadhiiyaa dhalinyaro ayaad tihiiin mustaqbalka idinkaa le, anagu taagero ayan ku joogna udiyaar garooba, oo isku diyaariya in aad la wareegtan oo hawsha naga furataan anaguna aanu nasano udiyaar garooba,

Waxad udiyaar garobaysaan daacad nimo, aqoon, iyo alle kacabsi, intaa udadaala, intii itaalkayaga ahna haday noqotu daryeelka shaqaalaha ama tobobar ha noqoto wixii kasta oo ay awoodi noo samaxdaba insha allah waanu fulinaynaa Tobobarkeeni labada cisho soo socdayna halkaas ayuu inoogu xidhan yahay, aadna wad u mahadsantiin labadi cisho ee halkan tobobarka ku qaadanayseen, aqoontana sii gaadhsiya inta maqan.



## Buugga Xogsidaha Cashuurta iyo Cashuur-bixiyaha

### 3.7 Cashuurta Mashaariicda /Qandaraasyada

#### 3.7.1 Maxay Tahay Cashuurta mashaariicda/qandaraasyada ?

Waxaa weeye: “Waa cashuurta ku waajibtey Mashaariicda Qiimaha leh ee laga fulinayo gudaha dalka. Sida uu qabo xeerka cashuurta diwaan-gelinta Xeer Lr83 /96 ee lagu xusay jaantuska 7aad ee xeerka dakhliga Xeer Lr72/2016.”

#### 3.7.2 Waa imisa tacriifadda mashaariicda/qandaraasyada ?

Waxaa la bixiyaa: Cashuur dhan 3.1% oo ku dhacaysa qiimaha guud ee Mashaariicda/Qandaraasyada

#### 3.7.3 Side loo bixiyaa cashuurta mashaariicda/qandaraasyada ?

Waxa lagu bixiyaa: Foom-(ka) u gaar ah Cashuurta Diwaan-gelinta oo uu ku lifaaqan yahay koobbi heshiiskii mashruucaasi.

Cashuurta Mashaariicda/Qandaraasyada waxa lagu bixinaya 15 Cisho oo ka bilaabmaya marka heshiishka mashruucaas la dhameeyo ama muddada heshiishka ku xusan ee kale ee la bixinayo lacag bixinta heshiishka iyo iwm).

### 3.8 Cashuurta waddo-marista gaadiidka

#### 3.8.1 Maxay tahay cashuurta waddo-marista gaadiidku?

Cashuurta gaadiidku waxa weeye: “Cashuurta ku waajibtay waddo-marista gaadiidka”.

#### 3.8.2 Waa imisa tacriifadda cashuurta waddo-marista ?

Cashuurta waddo-marista gaadiidka inta la bixiyaa waxa ay ku xidhan tahay: nooca gaadhiga, tiyoo loo eegayo HP- ga iyo tan-ka gaadhiga, waana qiime go’an oo ku xusan tacriifadda waddo-marista; ka akhri tacriifadda cashuurta waddo-marista ee dhammaadka buugga ku lifaaqan.

#### 3.8.3 Side loo bixiyaa cashuurta waddo-marista gaadiidku?

Cashuurta waddo-marista Gaadiidka waxa la bixiyaa: lixdii bilood ba hal mar ama laba jeer oo kala ah bisha 1 ilaa bisha 6 iyo bisha 7 ilaa bisha 12 sannadkii ba. Iyo si sanadle ahba.

## 3.9 Cashuurta Moorka (Stamp Tax)

### 3.9.1 . Tacriifadda Cashuurta moorka

- Boqolayda Saami Quman Ee Cashuurta Moorka marka laga reebo mushaarooyinka iyo gunooyinka oo ah 1%; Boqolayda saami quman (proportional rate) ee lagu qaado moorka dakhliga (stamp duty) ama tan qiimaha (stamp tax) waxa weeyi 2.5%, iyadoo ku xidhan nooca dokumentiyada, noocyada qoraaladaasi waa sidan soo socota
- Cashuurta moorka ee saami quman (proportional) waxay ku waajibaysaa qofka waajibaadka lacag bixineed lagu leeyahay ee badeecadda iyo adeegga loo fidiyay,

### 3.9.2 waa imisa Nooca Cashuurta ?

Cashuurta moorku waa laba nooc mid xadidan iyo mid saami quman ah (FIXED OR PROPORTIONAL)

- Cashuurta moorka ee xadiddan waxa lagu waajibin doonaa tacriifo kaliya qoraalada iyo dokumentiyada sifaha gaarka leh, waxana la saari doona badanaa cashuurta mid kasta oo ka mida qoraaladaas iyo dokumentiyadaas.
- Cashuurta moorka ee saami quman waxay noqonaysaa boqolay la saarayo qiimaha la cashuurayo ee qoraalada ama dokumentiyada

## 4 Ajuurooyinka Adeegyadda Kale Duwan Ee Dawladda

### 4.1 Ajuuradda liisamadda ganacsiga

#### 4.1.1 Waa maxay ajuuradda Liisamada Ganacsigu?

Ajuurooyinka Liisamada ganacsigu waxa weeye lacagta laga qaado qofkasta oo doonaya in uu samaysto liisan ganacsi oo cusub ama dib-cusbooneysiin.

#### 4.1.2 Waa imisa tacriifadda ajuurooyinka liisamadda ganacsigu?

Ajuurooyinka Liisamada Ganacsiga waxay ku xidhan tahay darajada iyo nooca Liisanka oo loo eegayo Tacriifadda Liisamada, fadlan booqo websitka wasaaradda [www.slmofo.org](http://www.slmofo.org) kalana dag buuga tacriifadaha.

#### 4.1.3 Side loo bixiyaa ajuurooyinka liisamadda ganacsigu?

Ajuurooyinka liisamadda ganacsigu ajuurooyinka Liisamada Ganacsiga waxaa loo bixiyaa sannadle kana bilaabmaya xilliga aad bixisay lacagta Khidmadda Liisanka.

#### 4.1.4 Noocyadda Ganaax ee la xidhiidha liisanka ganacsiga

Tir	Sababta ganaaxa	Sharaxa	Xadiga Ganaaxa
1.	Cusboonaysiin waaya liisanka ganacsiga	hal bil kadib xiliga uu liisanku dhacay	10% cashuurta liisanka ganacsi
		laba bilood kadib xiliga uu liisanku dhacay	25% cashuurta liisanka ganacsi
		3 bilood iyo wixii ka badan xiliga uu liisanku dhacay	50% cashuurta liisanka ganacsi
2.	Liisan lumay ama Waxyeelobay	Kadib marka ay Wasaaradda Ganacsigu xaqiijiso in uu liisanka ganacsigu u lumay ama u waxyeelobay masuuliyad daro	Waxa laga qaadaya ganaax dhan 5% cashuurta liisanka lumay ama waxyeeladu soo gaadhay
3.	Faldambiyeedyada Lidka ku ah Liisanka ganacsi	Sida liisanka u adeegsada micno ka duwan ki loo siiyay, diida in uu liisanka tuso cidda awooda u leh ama bixisay liisanka, kireeya liisanka diida liisanka haddii lagu amro soo celinta liisanka, ama si badheedha ufala ficil uu kaga baxsanayo cashuurta liisanka.	Ganaax lacageed oo u dhexeeya 3,000,000 ilaa 7,000,000 slsh
4.	Lagala noqday ama laga mamnuucay liisan ganacsi	Qofkasta oo lagu arko faldambiyeed sida uu dhigayo xeerku, ee lagala noqdo ama laga mamnuuco liisan ganacsi, ee lagu arko ka ganacsiga shaygii laga mamnuucay	Ganaax lacageed oo u dhexeeya 4,000,000 ilaa 6,000,000 slsh



## Buugga Qiimaynta Badeecadaha (Customs Valuation Book 2020)

Tariff No.	Description Goods	Statistics No.	Unit of Measurement	Value in US \$	Rate %
1902.19	Macaroni	048319	Per/KG	\$ 0.46	10%
1902.19	Instant Pasta (Noodles)	048319	Per/KG	\$0.50	10%
1901.10	Infant Food	098930	Per/KG	\$ 1.50	7%
1904.20	Corn Flacks	048160	Per/KG	\$ 0.50	30%
1904.20	Chips	048160	Per/KG	\$0.50	30%
1904.20	Oats	048160	Per/KG	\$ 0.40	25%
1904.20	Oats in sacks/bags	048160	Per/KG	\$ 0.15	25%
2005.40	Beans Foul ( Preserved)	056791	Per/KG	\$ 0.30	30%
1902.30	Biscuits European origin	048429	Per/KG	\$ 1	30%
1905.23	Pop-Corn		KG	\$0.40	30%
1905.30	Abu Walad, Hudhud ETC	048429	Per/KG	\$ 0.18	30%
1905.30	Waffers	048429	Per/KG	\$ 0.18	30%
1905.30	Gullan biscuit	048429	Per/KG	\$ 0.20	30%
1905.30	Ealvan chocolate kingtat nuss& power	048429	Per/KG	\$ 0.15	30%
1905.30	Parle glucose biscuits	048429	Per/KG	\$ 0.10	30%
1905.30	Biscuits with Honey/Fruits	048429	Per/KG	\$ 0.25	30%
1905.90	Ice Cream Powder	048429	Per/Kg	\$0.4	30%
1905.90	Ice Cream Biscuits	048421	Per/KG	\$ 0.30	30%
1905.90	Chocolate cream	048421	Per/KG	\$ 0.40	30%
1905.90	Chocolate powder	048421	Per/KG	\$ 0.35	30%
1905.90	All Bakery Production cakes ETC	048494	Per/KG	\$ 0.30	30%
1905.91	Empty Catchets	48491	Doz	\$ 0.2	30%
	<b>Chapter 20</b>				
	<b>Preparation of Vegetables, Fruits, Nuts and other parts of plants</b>				
2001.10.00	Onions with vinegar or acetic acids ( Processed)	056712	Kg	\$ 0.45	40%
2001.10.00	Satric Acid		LTR	\$0.44	40%
2002.10.00	Tomato paste	056720	KG	\$ 0.65	15%
2003.10.00	Mush Rooms/truffles	056741	Kg	\$ 0.99	15%
2005.90	Pepper paste ( Basbaas)	056799	Kg	\$ 0.55	15%
2007.99	Jams	058109	Kg	\$ 1.16	30%
2007.10	Fruits with jelly	098131	Kg	\$ 1.65	30%
2007.91	Marmalades	058101	Kg	\$ 1.65	30%

Tariff No.	Description Goods	Statistics No.	Unit of Measurement	Value in US \$	Rate %
2008.20	Pineapple with Juice	058930	Kg	\$ 0.22	40%
2009.20	Grape Juice	059200	Kg	\$ 0.39	40%
2009.20	Fruit Drinks ( Junior)	059200	LTR	\$0.24	40%
2009.20	Fruit Drinks 125MLT	059200	LTR	\$0.24	40%
2009.20	Small Fruit Drinks 126-250 MLT	59200	LTR	\$0.29	40%
2009.20	Small Fruit Drinks 125 MLT	59200	LTR	\$0.24	40%
2009.20	Juices, I.E Mango,Pineapple,Apple,Orange,etc	59200	LTR	\$0.31	40%
2009.20	Concentrated vimto in bottle	059200	LTR	\$0.31	40%
2008.70	Beaches with Juice	059200	Kg	\$ 0.39	40%
2008.92	Mix fruits with juice	058970	Kg	\$ 0.39	40%
2004.10	Onions preserved	056610	Kg	\$ 0.50	40%
2004.90	Other Vegetable mixture	056690	Kg	\$ 0.50	40%
2006.20	Vegetables, Fruits and Fruit peels	062100	Kg	\$ 0.50	40%
2008.20	Apple, Orange and Mango (all Kinds of fruits)	058930	Kg	\$ 0.35	40%
	<b>Chapter 21</b>				
	<b>Miscellaneous Edible Preparations</b>				
2101.12.00	Roasted, Grinded or Ness Coffee	074322	Kg	\$ 1.5	25%
2101.20.00	Tea in Packets ( Lipton, Red label etc )	098611	Kg	\$ 2.5	7%
2102.10.00	Yeast: active or inactive; other singlecell micro-organisms, prepared baking powders	098420	kg	\$ 0.50	15%
2103.20.00	Tomato Ketch, Tomato Sauce, Hot Sauce and Others	098500	Kg	\$ 0.76	15%
2104.10	Other Soups in any Form all kinds	098490	Kg	\$ 0.80	15%
2101.30	Mustard Pudding	098430	Kg	\$ 0.30	15%
2106.10	Preparing or flavoring food preserved Others ( Salad ) Dressing	0998991	Kg	\$ 1	15%
2106.10	Mooniyooos	0998991	KG	\$0.70	15%
2103.90	Other Spices preserved	098490	Kg	\$ 0.9	15%
2105.00	Ice Cream and other Edible Ices	2105.00	Kg	\$ 0.4	15%

Tariff No.	Description Goods	Statistics No.	Unit of Measurement	Value in US \$	Rate %
	<b>Chapter 22</b>				
	<b>Beverage, Sprints, Vinegar</b>				
2201.10.00	Mineral Water	2201.10	LTR	\$ 0.32	40%
2201.10.00	Zamzam Water	2201.10	LTR	\$ 0.195	40%
2201.10.00	Aerated Waters	2201.10	LTR	\$ 0.195	40%
2009.11.12	Powder of soft drinks	059190	KG	\$ 0.39	40%
2009.11.12	Protein powder drinks	059190	KG	\$ 2.00	40%
2008.80	Highly concentrated	058952	LTR	\$ 0.39	40%
2203.00.00	Non-Alcoholic Bear (Malt)	112320	LTR	\$ 0.50	40%
2203.00.00	Non alcoholic beer	2203.00	LTR	\$ 0.50	40%
2009.20	Energy Drinks	59200	LTR	\$ 0.50	40%
2206.00.00	Coca, Fanta, Seven up, Orange, Vimto ,Sprite weather in bottle, tins or other container	112200	LTR	\$ 0.50	40%
2206.00.00	Pepsi cola	112200	LTR	\$ 0.50	40%
2206.00.00	Rani Tufaax with Soda 500ML	112200	LTR	\$0.35	40%
2209.00.00	Vinegar	2209.00	LTR	\$ 0.84	15%
	<b>Chapter 23</b>				
	<b>Residues and waste from food industries</b>				
	<b>Prepared animal fodder</b>				
2301.10.00	Flours, Meat offal of fish purposed fodder animal	081410	Kg	\$ 1.00	30%
2321.10.00	Any kind of cereal purposed	081240	Kg	\$ 0.25	20%
2321.10.00	fodder animal (Calafka Xoolaha)	081240	Per 50 KGs	\$3.00	20%
2303.10.00	Residues of Starch Manufactures and similar	081510	Kg	\$ 0.25	20%
2304.10.00	Oil Cake and other solid residues	0811320		\$ 0.25	20%
2306.90.00	Fodder Animal Seeds	081389		\$ 0.40	20%
2309.10.00	Dog, or cat food preserved	081950		\$ 0.40	20%
2309.10.00	Hay (Grass for animals)	081950	50 Kg	\$0.50	20%
2309.10.00	Mankaal (Qashinka Sisinta)	081950	50 Kg	\$3.00	20%



Wasaaradda Horumarinta Maaliyada Somaliland oo abaalmarisay shaqaalahaedii ugu wanaagsanaa sanadkii 2023.





**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**  
**WASAARADDA HORUMARINTA MAALIYADDA**

**CASHUURTA IIBKA** **5%**  
**ADEEGYADA IYO BADEECADAHA (GST)**



**ADEEGYADA  
KORONTADA**



**BADEECADAHA  
DALKA LAGU  
FARSAMEEYO**



**IIBKA  
BIYAHA**



**IIBKA AY  
HUDHEELADU  
SAMEEYAAN**



**IIBKA AY  
TELEFISHANNADU  
SAMEEYAAN**



**IIBKA  
TIGIDHADA  
GAADIIDKA**



**ADEEGYADA  
ISGAADHSIINTA**



**slmof.org**



**Info@slmof.org**

